


MAXAAD KA TAQAANNAA

# SHIICADA?

SH.CABDIKARIIM XASAN XOOSH

DIYAARIYE:
AXMED DAAHIR (KHAYR JECLE)

# Nuxurka Muxaadarada[1]

# ماذا تعرف عن الشيعة؟

# Maxaad ka taqaannaa Shiicada?

**لفضيلة الشيخ العلامة: عبد الكريم حسن حوش (حفظه الله تعالى)**

Diyaariye: Axmed Daahir Cali (Khayr Jecle)

Kala xidhiidh Diyaariyaha:

Whatsapp: +252 63 4343306

Telegram: +252 65 9335111

Facebook: https://www.facebook.com/axmedburcawi/

Facebook Page: https://www.facebook.com/war.tubtatoosan

[1] Labo Muxaadaro ayay ahayeen, Labadiiba halkan way ku dhan yihiin.

# Tusmada Buugga

Tusmada Buugga ........ 3
Shiicada iyo Soomaalidu aqoon isuma laha? ........ 5
Qeexista Ereyga (Shiico): ........ 6
Yaa aas-aasay shiicada? ........ 7
Aas-Aaasaha Shiicada, Wax ka oggoow ........ 7
Kooxaha Shiicada ee Gaalnimadooda aan la isku hayn ........ 9
1. Qolada saba'iyada ........ 9
2. Qolada Quraabiyada ........ 9
3. Qolada Nusayriya ........ 9
4. Qolada Duruus ........ 10
5. Qolada Ismaaciiliyada ........ 10
Shiicada Sucuudigu waa laba nooc: ........ 11
Culamadii hore, Kooxaha ay u qaybin jireen Shiicada ........ 11
Kooxaha Saydiyada: ........ 12
Heshiiska Iiraan iyo Xuuthiyiintu kala qorteen ........ 13
Magacyada Raafidada ........ 13
12-kooda Imaam, immisa ayaa xil qabtay? ........ 15
Khuddada Iiraan ee 50-ka Sanno ........ 16
Caqaa'idda Kufriga ah ee ay qabaan Raafidadu ........ 17
1. Qur'aanku waa muxarraf ........ 17
6666-ka Aayaddood ee Soomaalidu sheeggaan, waxba kama jiraan ........ 18
Taqiyadu waa Maxay? ........ 19
Salaatu Lacniga Shiicadu tukato ........ 22

عقيدة البَدَاء ........ 28
Caqiidada Badaaga ........ 28
شرك في الإمامة ........ 29
Dalaalaatka ay ku jiraan Shiicadu: ........ 32
Kutubta Shiicada agtooda ugu qiimaha badan ........ 33
Mutcada ay Shiicadu Aaminsan yihiin ........ 36
Mutcadii mar bannaanayd maaha Mutcada Shiicada ........ 37
Shiicadu Gaalada miyay iska celisaa? ........ 39
Qabsashadii Baqdaad, iyo Xasuuqii 1-ka Milyan ee Ahlu Sunnaha ah la xasuuqay, iyo Raafido inay Xasuuqaa Geysteen ........ 39
Kulmista ay ku kulmeen Culamadu Gaalaysiinta Raafido: ........ 43

## Shiicada iyo Soomaalidu aqoon isuma laha?

Shiicada in badan waa la maqlaa, laakiin dad badani Shiicada iyo waxay qabaan, iyo waxay rumaysan yihiin ma yaqaannaan.

Waxa laga yaabbaa, Dadka qaarkood in ay u qabaan, Shiicadu in ay tahay afarta Mad-habood oo kale.

Markaa waxa habboon in loo aqoon yeesho oo la ogaaddo Shiicadu waxa ay tahay.

Maantana Caalamka aad ayay ugu fiddaa, Meelo badan oo aanay ka jiri jirinna way ka jirtaa, waxa ay isku dayayaanna meel walba oo aan laga aqoonnin in ay galaan, Mad-habkooda iyo Caqiidadooda Kharribanna ku faafiyaan, waddamo badan oo waddamada islaamka ka mid ah oo aan shiico ka jiri jirinna waa laga bilaabay hadda shiico, oo mad-habkii Shiicannimada ayaa laga bilaabay in lagu faafiyo, xarumana loogu sameeyo.

Soomaalida shiico ma ka jiri jirin waqtitigii hore, hadda laakiin ifafaalihiisu wuu bilaabmay, waxana jira dad badan oo soomaali ah oo lagu raadeeyay mad-habkii shiicannimada.

- internaddada waxa ku jira soomaali loo laqqimayo mad-habkii shiicanimada.
- waxa ku jira qaar ku doodaya oo hadallo jeedinaya, waraysiyana bixinaya, iyaga oo shiicada u doodaya, oo Shiicannimadu in ay sax Tahay ka hadlaya, waxa jira soomaali saxaabadii qaarkood nacdalysa.

- internetka waxa ku jira Nin Soomaali ah oo loo laqqimayo oo Caa'isha nacdalaya (Hooyadii Mu'miniinta. Xaaskii Nabiga (ANKH) ayuu leeyahay

(عائشة الملعونة) عليه من الله ما يستحق.

Ifafaalahaasi maadaama uu bilaabmay, waxa laga maarmaan noqotay in shiicanimada wax laga ogaaddo.

## Qeexista Ereyga (Shiico):

Ereyga الشيعة luqa ahaan waxa uu noqonayaa: الفئة ama Koox.

Sida Culamadu ay ku heshiiyeenna waxa la yidhaahdaa: **"kuwa Cali iyo Tafiirtiisii ka wali yeelanaya, jeclaanaya, iyagana u xaglinaya, kana faddilaya saxaabadii kale"**

Shiicaduna waxa ay leedahay kooxo badan oo sii kala daran, laakiin qadarka ka dhexeeya waxa uu yahay: **in ay cali (RC) ka aaminsan yihiin in uu yahay ka ugu khayrka badan, uguna fadliga badan saxaabada rasuulka, isla markaana uu isagu xaq u lahaa in uu qabto maamulka Muslimiinta Nabiga markii la oofsaday dabadeed, ayna ahayn in cid kale qabato, haddii cid kale qabatona ay tahay in laga boobay, cali dabadiinna tafiirtii cali in ay qabanayso.**

Qadarka ka dhexeeya Firaqa shiicadu waa intaas.

## Yaa aas-aasay shiicada?

Shiicanimada waxa aas-aasay Nin yahuudi ah oo **Cabdilaahi Binu Saba'** la odhan jiray. Ninkaasi islaamnimo ayuu muujistay, waxa uuna islaamnimada u muujistay si uu diinta islaamka u fasahaadiyo, oo cadow dibadeed in aanu diinta islaamka waxba yeelayn ayuu gartay, dabeetana waxa uu is yidhi dhex gal oo Gudaha ka fasahaadi.

## Aas-Aaasaha Shiicada, Wax ka oggoow

Culamadu waxa ay yidhaahdeen Ninkaas islaamnimadu dhab kama ahayn, waxaana taas caddaynaya; waxa ka soo baxay ee uu markii dambe la yimi.

Markii hore waxa uu ku bilaabay in uu yidhaahdo; Maamulka Muslimiinta waxa xaq u leh In uu qabto Cali Binu abii daalib, oo marka nabiga la oofsaday ciddii u xaq lahayd ee loo dardaarmay waxa ay ahayd Cali binu abii daalib, taas ayuu ku biaabay, waxa uu yidhi Nabi walba waxa uu leeyahay **W**asi, Nabi Muxammadna Cali binu abii daalib ayuu u dardaarmay jagada, waxa la yidhaahdaa sidaa waagii horena waa aaminsanaa, oo sidaa uu cali ku sheegayo waxa uu ka aaminsanaa Yuushac in uu u dardaarmay Nabi Muuse, oo Yuushacna wuu ku talax tagi jiray markii uu Yuhuudiga ahaa, Markii dambena waxa uu yidhi; waxa xaq u leh oo loo dardaarmay talada ummadda Cali binu abii daalib Rasuulka dabadii, kuma joogin qadarkaa ee wax **Rajco** la yidhaahdo ayuu sheegay, oo waxa uu yidhi; Maxamed waa soo noqon doonnaa, oo dib ayuu u soo noolaanayaa, waxa la yaab leh ayuu yidhi; Dadka aaminsan Ciise ayaa soo noqonaya, haddana leh Nabi Muxamad soo

noqon maayo, say u dhici kartaa?!! Muxammad ayaa uga mudan in uu soo noqdo!!! kuma joogin intaas'e, waxa uu markii dambe yidhi; Cali waaba ilaah oo daatadii ilaahay baa dhex gashay oo waaba Macbuud, Caqiidadiisaa waa faafiyay Ninkaasi waddamo badan ayuu iskaga dab qaaday oo Shaam iyo Ciraaq iyo Masarba leh. Cali oo nool ayay yidhaahdeen; Caliyoow ilaah baad tahay, shiicadii ayay na ka mid ahaayeen kuwa sidaa odhanaya, manay wada odhan sidaas ee qayb ka mid ah ayaa sidaa yidhi, qaybtii sidaa tidhi cali godad ayuu u qoday dab ayuuna ku shiday. Waa tuu lahaa Cali:

لما رأيت الأمرَ أمرا منكرا *** أجّجتُ ناري ودعوت قَنبرا

"Markaan arkay arrin aad u foolxun oo aan loo dulqaadan Karin, Dabkaygii ayaan huriyay, Qanbarna waan u yeedhay"

Qanbar waa Ninkii uga msuulka ahaa dadkaa gaaloobay in uu dabka ku guro.

(Nb: Cabdillaahi Binu Cabbaas (Rc) markii uu maqlay Dadkaa la gubay, waxa uu yidhi: Anigu waan Layn lahaa, laakiin Dab kuma qabteen, Maxaa yeelay:

"لا ينبغي أن يعذّب بالنار إلا ربّ النار" كما في الصحيح عنه ﷺ.

## Kooxaha Shiicada ee Gaalnimadooda aan la isku hayn

Kooxaha shiicada qaar badan ayaan gaalnimadooda la isku khilaafsanayn, waxa ka mid ah:

1. Qolada saba'iyada la yidhaahdo ee Cabdilaahi binu Saba' loo Nisbeeyo, waa kuwaa uu ku gurayay Cali dabka.
2. Qolada Quraabiyada la yidhaahdo.

Maxaa Quraabiyah loo yidhi:

Quraab waa Tukaha, laba Tuke haddii midna kaa taggo midna kuu yimaaddo miyaad kala garan kartaa, waxa ay yidhaahdaan Cali iyo Muxammed sida ay laba Tuke iskugu eegyihiin ayay iskugu eekaayeen, Risaalada iyo Nabinimaduba waxa ay ku socotay Cali ee Malaku jibriilkii loo soo dhiibay ayaa Muxammad ku qalday cali, oo mooday in uu Caligiii yahay, Quraabiyaa la yidhaahdaa, la iskuma khilaafsana in ay gaalo yihiin, waana koox shiicada ka mid ah.
3. Qolada Nusayriya la yidhaahdo, Maxamed binu Nusayr Nin la yidhaahdo ayay u abtirsadaan, waana koox baadiniya ah, Gaalnimadooda iyagana la iskuma khilaafsana. Waana Qolada ka Talisa Suuriya, Ee Xaafid Asad iyo Wiilkiisa Bashaar Asad ay ka mid yihiin, Iyagana la iskuma hayo Gaalnimadooda, waa kuwa yidhaahda:

لا إله إلا حيدرةُ الأنزع البطين

Xaydarahana Cali ayay ujeeddaan, Shaykhul Islaam marka uu ka hadlayo waxa uu yidhaahdaa:

أكفرُ من اليهود والنصارى

Yahuud iyo Kiristan way ka gaalnimo badan yihiin Nusayriyadu.

4. Qolada Duruus, iyagana la iskuma khilaafsana Gaalnimadooda, waana baadiniyah, caqaa'id kufriya oo bandanna wey leeyihiin, Muxaramaatka oo dhan ayay xalaashanayaan, waajibaatka oo dhanna way dafirayaan, Muslimiinta ayay ugu neceb yihiin Gaalada iyo Yahuuddana way jecel yihiin, waxay ka jiraan Lubnaan (waana halkay ugu badan yihiin) suuriya, filasdiin, Qaybta duruusta ee filasdiin degta marka ay muslimiinta iyo Yahuuddu dagaalamayaan, Yahuuda ayay soo raacaan, markii dambena toos ayay u dhex galeen, oo xattaa ciidamadooda ayay ku biireen, Maraatib sarena agtooda way ka heleen.

5. Qolada Ismaaciiliyada, iyaguna waa firqa baadiniya, waxayna ka mid yihiin kuwooda Gaalnimadoodu caddahay.

Hindiya qaar ayaa dega, Gobolka Najraan la yidhaahdo ee Sucuudiga ka mid ahna qaar ayaa degga.

## Shiicada Sucuudigu waa laba nooc:

1) Qolo waa raafido, oo waa qolada Qadiif iyo Khabar iyo meelahaa degga, Madiinana Makhaawilada nimanka la yidhaahdo weeyaan, kuwaasi waa Raafido, Qoladii khumayni.
2) Qolada labaad ismaaciiliyah ayaa la yidhaahdaa, Mukaarimana waa la yidhaahdaa, oo Najraan ayay ku dhaqan yihiin.

Qolada Raafidadu way gaalaysiiyaan Ismaaciiliyada iyo Nusayriyadaba, laakiin dan kale ayay ka leeyihiin markay u gargaarayaan, waxay ka leeyihiin mad-habkooda inay hadhow ku faafiyaan.

Markaa firaq badan oo shiicada ka mid ah oo gaalnimadooda aan shaki ku jirin ayaa jira, mid kasta oo raba in uu islaamka fasahaadiyo waxa uu soo xidhaa shaadhka shiicada.

Laakiin waxa hadalkeennu u badan doonnaa qolada la yidhaahdo

الرافضة، أو الإمامية، أو الاثني عشرية

## Culamadii hore, Kooxaha ay u qaybin jireen Shiicada

Shiicada waxa ay u qaybin jireen culamadii hore saddex qolo oo kala ah:

1. غالية　　2. سبّابة　　3. مفضِّلة

1. Qaar Talax-tag badan la yimi 2. Qaar Caaya Saxaabada Rasuulka (ANKH) 3. Qaar ka Faddila (Sarraysiiya) Cali Saxaabada Kale oo dhan.

Waqtiyadii dambe, kuwaa sabbaabada la yidhahdo waxa ay noqdeen qaaliyah, sida shawkaani iyo qayrkiiba sheeggeen.

Qolada saddexaad ee Mufaddilah la yidhaahdo waa Saydiyah, saydiyadu waxa ay u abtirsanayaan Sayd binu Cali binu Xuseen binu Cali binu abii Daalib, waxa ayna ku dhaqnaayeen yemen, iyaga laftooduna kooxo ayay u qaybsameen.

## Kooxaha Saydiyada:

جارودية، صالحية، بترية، يعقوبية

Firaqaa saydiyada waxa ugu darnayd **Jaaruudiyada**, Jaaruudiyadu waa qoloda ay yihiin **Xuuthiyiinta** ka dagaallama Yemen, waxa ayna ahaayeen qaar ka talax-tag badan kooxaha kale ee Saydiyada, xagga Raafidada ayayna u dhowaayeen.

Oo si guud Saydiyadu ha qabaan in Cali (Rc) ugu fadli badan yahay Saxaabada, laakiin badankoodu waxa ay lahaayeen khilaafada kii laga fadliga badnaa xilka qabanayo isaga oo kii fadliga badnaa joogga way asaxaysaa, qaladba ha noqotee, maahana gaalnimo iyo fisqi wax keensanaya. Laakiin Jaaruudiyadu waxa ay lahaayeen; Maya taasi waa gaalnimo, taasna waxa ay kala mid ahaayeen Raafidada. Haddana Raafidadu waxa ay qabeen in ay Jaaruudiyadu gaalo tahay[1].

Qolada Jaaruudiyadu -waa xuuthiyiinta'e- waxa ay hadda u sii siqayaan dhinaca Raafidada, iyaga oo markii horeba Talax-tag badan ku jiray, oo aan Saydiyada kale la mid ahayn.

[1] iyagiibaa is gaalaysiinaya, ma cid kale ayay caano u lisayaan!!!.

Shiicada Yemen oo dhanna wada Xuuthiyiin maaha, kuwan iiraan ayay isku xidheen.

## Heshiiska Iiraan iyo Xuuthiyiintu kala qorteen

waxaana jirta waraaq ay kala qorteen oo ku sabsan mad-habkooda iyo Caqiidadooda oo la yidhaahdo

الوثيقة الفكرية[1]

Qolada Raafidadu waa kuwa maanta ugu badan, faafinta shiicanimadana caalamka maanta aad uga shaqeeya, baladdo badan oo aan shiicanimo ka jirinna ka jirsiiyay, magacyo kala duduwanna waa leeyihiin kooxdaasi:

## Magacyada Raafidada

الإمامية، الإثني عشرية، الرافضة

Raafida waxa loo yidhi: Sayd binu Cali binu Xuseen binu Cali binu abii Daalib, ayaa madaxdii muslimiinta markaa joogtay ku baxay[2], markaas ayay shiicadii isugu soo habar wacdeen, si ay ugu gargaaraan, intaanay u gargaarin, garabkiisana aanay noqon ayay yidhaahdeen; waar horta ma iska hubsannaa? oo caqiidadiisa ma eegnaa? waxa ay ku imtixaameen oo ku yidhaadeen; Maxaad Abuu bakar iyo Cumar ka aaminsan tahay? waxa uu yidhi:

[1] انظر إلى هذه الوثيقة مع الرد عليها ودحضها https://alilmia.com/sub_book41_516.html

2 waxa laga yaabbaa Nusuusta diidaysa Madaxda Muslimiinta ee Fasaqada ah in lagu baxo in aanay soo gaadhin ama uu wax awilanayay.

"هما وزيرا جدي"

"Waa Gargaarayaashii Awowgay (Nabiga)[1]

Waxa ay rabeen in uu gaalaysiiyo, kana bari noqdo, isaguna wuu ammaanayba, dabeetana way ka dhaqaajiyeen, markaas ayuu yidhi:

"رفضتموني! رفضتموني!"

"Waad I tuurteen! Waad I tuurteen!"

Oo nimankaa imaamiyada la yidhaahdaa waxa ay yidhahdaan:

لا ولاءَ إلا ببراء

"Yacnii jacaylka iyo xidhiidhinta Aalu baytka la jeclaanayo, lagana wali yeelanayo asaxi mayso haddii aan laga bari noqon, lana gaalaysiin Abii bakar iyo Cumar, lana odhan; cadowyo ilaahay ayay ahaayeen", haddii qofku uu si kaste u leeyahay; waan jecelahay Aalu baytka, hase ahaatee aanu gaalaysiinayn Abii bakar iyo Cumar, waa iska sheegasho uun wixiisu.

Sidaas ayaa magaca Raafido kula baxeen, intii ka dhaqaaqday Sayd binu Cali ayaa Raafido noqotay, intii ku soo hadhayna Saydiyah ayay noqotay.

Hadda shiicada caalamka ugu badan waa Raafido.

**"Ithnay cashariyah"** Maxaa loogu bixiyay?

1 Saa waxa uu u leeyahay, Maxaa yeelay waxa uu ka isiran yahay Faadima Binti Rasuul (ANKH).

waxa ay aaminsan yihiin 12 Imaam oo Macsuumiin ah, oo aan dambaabin, qaldamin, Xilka Muslimiintana ay ahayd in ay iskaga dambeeyaan, oo marba marka midi dhinto ka kale qabto.

## 12-kooda Imaam, immisa ayaa xil qabtay?

12 kaa imaam ee ay sheegayaan mid talo qabtay kuma jiro marka laga reebo laba kaliya:

- Cali binu abii Daalib (Rc).
- Xasan ibnu Cali (Rc), oo muddo 6 bilood ku siman talada muslimiinta hayay, markii la dilay aabihii Cali (RC) 12-kaa imaam aaminsanaanta ay aaminsan yihiin inay jiraan daraaddeed ayaa **"ithnay cashariyah"** loo yidhi.

### Waxa Imaamiyah loo yidhi:

waxa ay aaminasan yihiin imaam Muntadar ah (la sugayo) oo sannaddu markay ahayd 260 hijriyada (qarnigii saddexaad) God galay, Godkii ayuu ku maqan yahay hurdo dheer ayuu galay, oo innaga oo qanigii 15 ku jirna wali ma soo bixin, marka ay sheegayaan Imaamkaa waxa ay yidhaahdaan, kuna duceeyaan

عجل الله فرجه، أو: عج (رمزا)

Imaamkaa khayaaliga ah sugitaanka ay sugayaan aawaddeed ayaa imaamiyah loogu magacaabay, ama sugista ay sugayaan 12-ka Imaam.

Caalamka maanta shiicada joogta qolada ugu badan waa qolada Raafidada ama Ithnaya cashariyaha ama Imaamiyah, waana qolada ugu badan Iiraan, khumaynina uu ka mid ahaa, Talada dalkana haysa, waa qolada hadda Ciraaq taladeeda loo dhiibay ee Gaaladu u dhiibtay, waa qolada labnaan joogta ee Xisbullaah isku magacawda[1], meelo kale oo badan oo caalamka ka mid ahna way ku dhaqan yihiin sida: Hindiya, Baakistaan Afqaanistaan, Baxrayn, Kuwayt, Qadar, Sucuudiga. Waddamo badan oo aanay ka jirinna waxay doonayaan inay ka jiraan, oo Dawlad ayaa u kacday wax walba la dhinac taaggan. Oo uu aasaasay khumayni[2], waa wax aanay waligood helin, Khumayni markay taladii iiraan qabteen, waxa uu yidhi:

"علينا تصدير الثورة إلى البلاد العربية"

"waxa ina saarran Kacdoonkan Raafidaynta ah ee aan ka bilownay Iiraan, in aan u dhoofinno oo gaadhsiinno Waddamadda Carabta oo dhan, oo aanan ku koobin Iiraan"

## Khuddada Iiraan ee 50-ka Sanno

Waxa ay dajiyeen khuddad la dhaho: **خطة خمسينية** oo loogu talo galay 50 sanno, oo la leeyahay tobankaa sanno waa in aan intaa qabannaa, tobankaa ku xigana waa in aan waxaa qabannaa.

Ahlu sunnihii ku dhaqnaa Iiraan aad ayaa loo dhibaa, cagta hoosteeda ayaana la galiyaa, badankana iclaanka kama soo muuqato cabudhintaas iyo jidh dilkaasi.

---

[1] (xisbullaahi maaha, ee waa xisbul laati wal cuzzaa)

[2] عليه من الله ما يستحق

# Caqaa'idda Kufriga ah ee ay qabaan Raafidadu

## Caqaa'idda ay rumaysan yihiin raafidadu Maxaa ka mid ah?

Nimankaa Raafidada la dhahaa Caqaa'id badan oo kufri ah ayay qabaan:

1. Qur'aanku waa muxarraf, waxa ay leeyihiin qur'aanka wax badan oo aan ku jirin ayaa lagu daray, wax badan oo ku jirayna waa laga saaray, tartiibtii Aayatkana waa la is daba mariyay, waliba ma laha wax yar ayaa laga saaray ee waxa ay leeyihiin; wax badan oo ku jiray ayaa laga saaray, oo waxa kutubtoodda Muctamadka ahi qoraysaa; in Aayatka musxafku yihiin **17,000 (Toddoba iyo toban kun oo aayadood)**[1] waxa aynnu ogsoonnahayna in Aayaatka Qur'aanku ay yihiin **6236** Aayadood (tacdaadka kuufiga ah) iyada oo tacdaado kala duwan ay jiraan, hase ahaatee ma laha tacdaadkaasi qur'aanka waxbaa ka dhiman ama waxbaa laga saaray, ee waxa ay leeyihin culamada qaarkood; waa aayad kaliya meel ay culamo kale leeyihiin waa laba aayadood, sida:

قَالَ تَعَالَى: ﴿صِرَاطَ ٱلَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ غَيْرِ ٱلْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلَا ٱلضَّآلِّينَ ۝٧﴾ الفاتحة: ٧

Culamada qaarkood waxa ay ka dhiggayaan intaas aayad.

[1] Kutubtooda ka ugu sixada badan, ee ay la simaan Bukhaariga ee la yidhaahdo: Kaafiga, waxa u uku yidhi: "عن أبي عبد الله قال: إن القرآن الذي جاء به جبريل إلى محمد صلى الله عليه وسلم سبعة عشر ألف آية" ج2 ص 634

## 6666-ka Aayaddood ee Soomaalidu sheeggaan, waxba kama jiraan

Warka Soomaalida agtooda ka caan baxay, ee odhanaya; Aayaatka Qur'aanku waa **6666** aayadood, wax ka jiraa ma jiraan, Culmada cid qabta sidaasina ma jirto.

Waxa ay yidhaahdeen; Faadumo waxa ay akhriyi jirtay Qur'aan kan aad akhridaan saddex laabkii ah, oo xaraf aanu kaga jirin kan aad akhridaan[1].

In la yidhaahdo Quraanku waa muxarraf waa shay gaalnimo ah, Allaah (SW) waxa uu yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا ٱلذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُۥ لَحَٰفِظُونَ ۝٩﴾ الحجر: ٩

"Annaga ayaa soo dajinnay Qur'aanka, Annaga ayaana ilaalinayna"

Raafidadu iyagu way isla oggol yihiin in uu Quraanku muxarraf yahay, waxa la sheeggaa afar waddaad oo ka mid ah inay yidhaahdeen; Qur'aanku muxarraf maaha, wax isdaba marsan iyo wax laga saaray toonna ma jirto, marka ay culamadooda kale ka jawaabayaan afartoodaa Waddaad, waxa ay yidhaahdaan: "Taas waxa ay u yidhaahdeen taqiya ahaan"

[1] Yaab badannaa!!! Oo Tolow لا إله إلا الله na miyaanay ku oollin ama ﷲ oo kaliyana miyaanay ku oollin?!!!!

## Taqiyadu waa Maxay?

Taqiyadu waa caqiida lunsan oo ay qabaan shiicadu, waa

Munaafaqayn, oo ah in uu qofku cid khilaafsan caqiidadiisa u sheeggan karo been, bal'ee uu ku dhaaran karo in aanu sidaa qabin, uuna nacdali karo cidda sidaa qabta, Yacnii Caqiidadiisa ayaa iyada oo aan wax dirqin ahi jirin Been ka sheegayaa!

way kuu bannaan tahay maaha'e, waxa ay leeyihiin waa Waajib in uu Taqiya sameeyo, caqiidadiisana ka been sheeggo.

Waxa ay xaqdarro ku daliishanayaan Aayadda uu Allaah yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿ إِلَّآ أَن تَتَّقُواْ مِنْهُمْ تُقَىٰةًۗ ۝٢٨ ﴾ آل عمران: ٢٨

Aayaddaasina waxa ay ku saabsanayd Gaaladu marka ay xoog roonaato, ayna dirqiyaan Ruuxii muslimka ahaa, in uu afka baarkiisa ka odhan karo Gaalnimadii, isaga oo aanay niyad ka ahayn, Qalbigiisuna ku xasilan yahay iimaanka.

Taqiyadaasi agtooda waxay ka tahay Diin, in laga tagaana waa Diin la'aan, waxa Imaamyaalkooda qaarkood ay ka soo raraan:

"التقية ديني ودين آبائي، من لا تقية له فلا دين له"

"تارك التقية كتارك الصلاة، تارك التقية كافر"

Waxa kale oo ku qoran kutubtooda in ay Imaamyaalkooda qaarkood ka sheeggeen:

"لولا أنه زيد في كتّاب الله ونُقص منه ما خفي حقّنا على ذي حِجّة"[1]

"Haddii aanay jiri lahayn, in Kitaabkii ilaahay wax lagu daray, waxna laga saaray, Xaqqayagu kama qarsoomeen mid Caqli u saaxiib ah"

Kutub ayayba ka qoreen in kitaabka ilaahay uu yahay muxarraf, Nin **D**abrasi la yidhaahdo oo culamadooda ka mid ah waxa uu qoray kitaab la yidhaahdo:

(فصل الخطاب في إثبات تحريف كتّاب ربّ الأرباب)

Iiraan ayaana lagu daabacay kitaabkaa, waxa uuna ku soo aroorinayaa kitaabkaas 2000 oo Riwaayo in ka badan oo uu leeyahay dhammaanteed waxa ay sugaysaa in kitaabkii ilaahay la beddalay, qaarkood waxa ay yidhaahdeen Qur'aanku in uu muxaraf yahay, waxa ay ka mid tahay Daruuriyaatka mad-habka shiicada.

Qaar ka mid ah culamadooda Mucaasiriinta ah ayaa waxa ay yidhaahdeen; Ma qabno in uu Qur'aanku Muxarraf yahay, Riwaayaatka sidaa sheegayana maaha kamana dhigna in aan ictiqaadsannahay sidaas, haddiiba laga tagi waayo Taxriifka waxa loo jeeddaa Taxriif xagga macnaha ah[2].

Waxyaabaha taxriifaatka ah ee ay la yimadeen wax la aqbali karo maaha, xattaa waxa ay yidhaahdeen suurado iska dhan ayaa ka maqan, sida suuratul khalci,

---

[1] بحار الأنوار ج29 ص 30

[2] Taasi waa tii ay awalba yaqaanneen ee diinta ka dhiggan jireen ee Taqiyada ahayd.

sidoo kale meelaha qaarkood ayaa Aayado ka maqan yihiin ayay yidhaahdeen, sida suuratu sharxi waxa ka maqan:

وجعلنا عليا صهرك

2. Waxa ka mid ah caqaa'idooda gaalnimada ah in ay qabaan, Saxaabadii Rasuulku (ANKH) in ay wada gaaloobeen, midhadh ka mid ah mooyaane, midhadhkaa riwaayaatka qaarkood waxa ay sheegayaan **3**, Riwaaya laabad: **5**, Riwaaya sadexaad **7**.

   markaa Saxaabada oo dhan waa gaalaysiinayaan.

   waxa ku qoran kitaabkooda kaafiga oo ay Imaamyaalkooda ka sheegayaan (way ku been abuuranayaan'e):

"كان الناس أهل ردّة بعد النبي صلى الله عليه وسلم إلا ثلاثة: المقداد بن الأسود، وأبي ذر الغفاري وسلمان الفارسي"[1]

   Waxa layaab leh saddexdaa ay sheegeen in aan mid ka mid ah ahayn Aalu baytkii, haddii la yidhaahdo dadka waxa ay ujeeddaan wixii aan Aalu bayt ahaynna waxa ka qasaysa Riwaayada kale ee ay soo reebayaan Cali, ee aanay soo reebayn Xasan iyo Xuseen toonna, iyaga oo haddana ka aaminsan in ay yihiin Imaamyaal Macsuumiin ah, markaa Saxaabada badankooda way

[1] فروع الكافي، كتاب الروضة ص 15

Gaalaysiinayaan midhadh yaryar mooyee, tirada ugu badan ee aanay gaalaysiinayn ee ay sheegeenna waa 7, waxa ay ugu neceb yihiin saddexda khulafo.

## Salaatu Lacniga Shiicadu tukato

waxa ay tukadaan salaad la yidhaahdo: Salaatu Lacni, waxa ayna ku ducaystaan:

اللهم العن طاغوتي قريش وجبتيها وصنميها وابنتيهما: أبي بكر وعمر

Qur'aankana haddaad akhrido waxa aad arkaysaa sida uu Allaah Saxaabada u Ammaanayo:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَٱلسَّٰبِقُونَ ٱلۡأَوَّلُونَ مِنَ ٱلۡمُهَٰجِرِينَ وَٱلۡأَنصَارِ وَٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُم بِإِحۡسَٰنٖ رَّضِيَ ٱللَّهُ عَنۡهُمۡ وَرَضُواْ
عَنۡهُ وَأَعَدَّ لَهُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي تَحۡتَهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ١٠٠﴾ التوبة: ١٠٠

Ilaahay saas ayuu u ammaanayaa, iyaguna saas ayay u gaalaysiinayaan, xattaa waxa ay leeyihiin, oo kutubtoodu qoraysaa Abuu bakar waxa uu Nabigu usii kaxaystay Markii uu rabay in uu hijroodo, si aanu gaalada ugu sheeggin!!!

Waxa uu allaah yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿لَا يَسۡتَوِي مِنكُم مَّنۡ أَنفَقَ مِن قَبۡلِ ٱلۡفَتۡحِ وَقَٰتَلَۚ أُوْلَٰٓئِكَ أَعۡظَمُ دَرَجَةٗ مِّنَ ٱلَّذِينَ أَنفَقُواْ مِنۢ بَعۡدُ وَقَٰتَلُواْۚ وَكُلّٗا وَعَدَ
ٱللَّهُ ٱلۡحُسۡنَىٰۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ خَبِيرٞ ١٠﴾ الحديد: ١٠

Janno ayaa loo ballan qaaday dhammaan saxaabadii, aayaddii horena sidaas oo kale ayay sheegaysay

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَأَعَدَّ لَهُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي تَحۡتَهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ١٠٠﴾ التوبة: ١٠٠

Aayaatka xashrina ilaahay wuu ku ammaanay Saxaabada:

قَالَ تَعَالَى: ﴿لِلْفُقَرَآءِ ٱلْمُهَٰجِرِينَ ٱلَّذِينَ أُخْرِجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِمْ وَأَمْوَٰلِهِمْ يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِّنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنًا وَيَنصُرُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ﴿٨﴾﴾ الحشر: ٨

Culamadii hore qaarkood ayaa nin Raafidi ah ku hor caayay Saxaabada, markaas ayuu ku yidhi: “miyaad ka mid tahay kuwa uu Allaah ku sheeggay:

قَالَ تَعَالَى: ﴿لِلْفُقَرَآءِ ٱلْمُهَٰجِرِينَ ٱلَّذِينَ أُخْرِجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِمْ وَأَمْوَٰلِهِمْ يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِّنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنًا وَيَنصُرُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ﴿٨﴾﴾ الحشر: ٨

markaas ayuu yidhi: maya, markaas ayuu ku yidhi: haddaa miyaad ka mid tahay kuwa lagu sheeggay:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَٱلَّذِينَ تَبَوَّءُو ٱلدَّارَ وَٱلْإِيمَٰنَ مِن قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ وَلَا يَجِدُونَ فِى صُدُورِهِمْ حَاجَةً مِّمَّآ أُوتُوا۟ وَيُؤْثِرُونَ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ ۚ وَمَن يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِۦ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٩﴾﴾ الحشر: ٩

markaas ayuu yidhi: maya, markas ayuu ku yidhi: “anna waxa aan ka marag kacayaa inaadan ka mid ahayn kuwa lagu sheeggay:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَٱلَّذِينَ جَآءُو مِنۢ بَعْدِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا ٱغْفِرْ لَنَا وَلِإِخْوَٰنِنَا ٱلَّذِينَ سَبَقُونَا بِٱلْإِيمَٰنِ وَلَا تَجْعَلْ فِى قُلُوبِنَا غِلًّا لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ رَبَّنَآ إِنَّكَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٠﴾﴾ الحشر: ١٠

Sida oo kale Allaah waxa uu ku ammaanaya Saxaabada Aayaatka suuratul fatxi:

قَالَ تَعَالَى: ﴿لَّقَدْ رَضِىَ ٱللَّهُ عَنِ ٱلْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ ٱلشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِى قُلُوبِهِمْ فَأَنزَلَ ٱلسَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَٰبَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا ﴿١٨﴾﴾ الفتح: ١٨

Nabiguna (ANKH) waxa uu yidhi:

"لا يدخل النار أحد بايع تحت الشجرة"

3. Waxa Caqaa'idooda gaalnimada ah ee ay qabaan ka mid ah; in ay Xaasaskii Nabiga Sino ku ganayaan, oo ay leeyihiin way sinaysatay Caa'ishi, iyada oo Allaah sino ka bari yeelay.

   Kutubtooda qaarkood waxa ay qorayaan:

   "إذا ظهر المهدي فإنه سيحيي عائشة ويقيم عليها الحدّ" حق اليقين للمجلسي

   "marka uu soo baxo Mahdigu (Imaamkooda Muntadarka ah) waxa uu soo noolaynayaa Caa'isha, Xadkana waa ka oogayaa"!!!

   Ilaahayna sino wuu ka bari yeelay Caa'isha, Ifki inay tahayna Allaah wuu ku sheegay, Toban Aayadood oo Suuratu Nuur ka mid ah, Xattaa mar dambe in lagu noqdana waa inaga wacdiyay Allaah:

   قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿يَعِظُكُمُ ٱللَّهُ أَن تَعُودُواْ لِمِثۡلِهِۦٓ أَبَدًا إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ١٧﴾ النور: ١٧

   Ta kale Xaasaska nabigu (ANKH) in ay marnaba Sino ku dhacaan, ma dhici karto, Waayo Nabigu (ANKH) waa Dayib, Afooyinkiisuna waa Dayibaat Cafiifaat ah.

4. Waxa caqiidadooda kufriga ah ka mid ah in ay yidhaahdeen Aakhiro dadka waxa xisaabaya Cali binu abi Daalib, dabeeto shiicadiisa waxa uu odhanayaa jannada gala

   قال المجلسي (وهو من معمميهم): "إن أمير المؤمنين عليه السلام لديّان الناس يوم القيامة"

   بحار الأنوار ج39 ص 200.

"Amiirul Mu'miniin Cali (Rc) isaga ayaa Xisaabaya Dadka Maalinka Qiyaame"

Kutubo kale oo kutubohooda ka mid ahina arrinkaa waa qorayaan, Warkaasi waa baadil, Allaah waxa uu yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿إِنَّ إِلَيْنَآ إِيَابَهُمْ ۝٢٥ ثُمَّ إِنَّ عَلَيْنَا حِسَابَهُم ۝٢٦﴾ الغاشية: ٢٥ - ٢٦

waxa kutubahooda ku yaalla; in Jannada loo abuuray Aalu baytka, Naartana cidda la collowda

"إنما خلقت الجنة لأهل البيت والنار لمن عاداهم" المعالم الزلفى ص 251.

5. Waxa caqaa'idooda kufriga ah ka mid ah, in ay leeyihiin Imaamyaalkoodu Qaybkay ogyihiin, waxa uu qorayaa kitaabka kaafigu:

"باب أن الأئمة عليهم السلام يعلمون متى يموتون، وأنهم لا يموتون إلا باختيار منهم"

ج1 ص 258-260

"باب وأنهم يعلمون ما في الضمائر وعلم المنايا والبلايا وفصل الخطاب والمواليد"

بحار الأنوار للمجلسي ج 26 ص 137، 153

Taasi macnaheedu waxa weeye; in loo sugo qaybkii cid aan Allaah ahayn, waliba waxa kutubta qaarkood qorayaan:

يعلمون ما كان وما يكون

"waxay Ogyihiin wixii dhacay iyo waxa dhici doonaba"

taasina waa gaalnimo, Allaah waxa uu yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿۞ وَعِندَهُۥ مَفَاتِحُ ٱلۡغَيۡبِ لَا يَعۡلَمُهَآ إِلَّا هُوَۚ وَيَعۡلَمُ مَا فِي ٱلۡبَرِّ وَٱلۡبَحۡرِۚ وَمَا تَسۡقُطُ مِن وَرَقَةٍ إِلَّا يَعۡلَمُهَا وَلَا حَبَّةٖ فِي ظُلُمَٰتِ ٱلۡأَرۡضِ وَلَا رَطۡبٖ وَلَا يَابِسٍ إِلَّا فِي كِتَٰبٖ مُّبِينٖ ٥٩﴾ الأنعام: ٥٩

Waa jirtaa in nabiyada qaybka wax laga ogaysiiyay, laakiin intii kale dadka ayay kala mid yihiin, intaasna Allaah ayaa ogaysiiyay

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿عَٰلِمُ ٱلۡغَيۡبِ فَلَا يُظۡهِرُ عَلَىٰ غَيۡبِهِۦٓ أَحَدًا ٢٦ إِلَّا مَنِ ٱرۡتَضَىٰ مِن رَّسُولٖ فَإِنَّهُۥ يَسۡلُكُ مِنۢ بَيۡنِ يَدَيۡهِ وَمِنۡ خَلۡفِهِۦ رَصَدٗا ٢٧﴾ الجن: ٢٦ – ٢٧

6. Waxa caqaa'idda gaalnimada ah ee ay aaminsan yihiin Raafidadu ka mid ah, in ay leeyihiin Imaamyaalkooda 12ka ah iyaga ayaa ka fadli badan Nabiyada iyo Malaa'igtaba, waxa kaafiga Bukhaarigooda ka dhiggan uu qorayaa in uu yidhi jacfaru Saadiq:

"ورب هذه الكعبة ثلاث مرات، لو كنت بين موسى والخضر لأخبرتهما أني أعلم منهما، ولأنبأتهما بما ليس في أيديهما" الكافي ج1 ص 260-261، بحار الأنوار ج26 ص 194

In badan Raafidadu way ku been abuurtaan jacfaru Saadiq, kanina waa been.

Khumayni laftiisu waxa uu yidhi:

"وإن من ضروريات مذهبنا أن لأئمتنا مقاما لا يبلغه ملك مقرّب ولا نبيّ مرسل" الحكومة الإسلامية.

Shayga daruuriga agtooda ka ahna haddii la inkiro gaalnimo ayay ka dhaliyaan, sida khumayni laftiisu sheeggayo.

وقال نعمة الله الجزائري: "الإمامة العامة التي هي فوق درجة النبوة والرسالة"

Waxana la ogsoon yahay basharka in ay ugu fadli badan yihiin Nabiyadu, in la yidhaahdo cid kale ayaa ka fadli badan waa beenin la beeninayo Qur'aanka waana gaalnimo.

7. Waxa gaalnimadooda ka mid ah in ay yidhaahdaan Imaamyaalkoodu dadka dhintay ayay soo nooleeyaan, sida ay yidhaahdeen Caa'isha mahdiga ayaa soo nooleynaya oo xadka ka oogaya, waxa kale oo ay yidhaahdeen; Abuu bakar iyo Cumar ayay soo nooleynayaan maalin walba intaas oo jeer markaasay haddana dilayaan.
8. Waxa ka mid ah Gaalnimadooda in ay yidhaahdeen: Arladani imaamka ayay u sugnaatay, Arlada Cali ayaa iska lahaa, ayay yidhaahden iyada iyo waxa ku dul suganba, dabeetana Tafiirtiisa ayaa yeelatay siday doonnaana waa u gali karaan.

   Bukhaarigoodu waxa uu qorayaa waa kaafiga'e:

باب أن الأرض كلها للإمام

Abuu cabdillaahi waa jacfaru saadiqii ay ku been abuuran jireen ayay waxay ka sheeggeen in uu yidhi:

"إن الدنيا والآخرة للإمام يضعها حيث يشاء"

Allaahna waxa uu inoo sheeggay:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَإِنَّ لَنَا لَلْآخِرَةَ وَالْأُولَىٰ ۝١٣﴾ الليل: ١٣

قَالَ تَعَالَى: ﴿قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ اسْتَعِينُوا بِاللَّهِ وَاصْبِرُوا ۖ إِنَّ الْأَرْضَ لِلَّهِ يُورِثُهَا مَن يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ ۖ وَالْعَاقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ ۝١٢٨﴾ الأعراف: ١٢٨

Markaa waa Gaalnimo, iyo beenin la beeninayo Qur'aanka.

9. Waxa ka mid ah Caqiidooyinkooda baadilka ah

عقيدة البَدَاء

## Caqiidada Badaaga

Badaagu waxa weeye in la yidhaahdo ilaahay wax aanu hore u ogayn ayaa dib ugu muuqanaya, oo uu uogaanayaa, waxayna yidhaahdeen wax ilaahay loogu dhowaado badaagaas ayaa ugu khayr badan, kaafigoodu waxa uu qorayaa

عن زُرارة بن الأعين عن بعض الأئمة: "ما عُبد الله بشي مثل البداء" ج1 ص 146

Waxa kale oo ay ka sheeggeen abuu cabdillaahigii ay ku been abuuran jireen in uu yidhi:

"ما عُظّم الله بمثل البداء" الكافي ج1 ص 146

Waxa kale oo ay ka sheeggeen abuu cabdilaahi in uu yidhi:

"لو علم الناس ما في القول بالبداء من الأجر ما فتروا عن الكلام فيه" الكافي ج1 ص 148

Bal ee qaarkood waxa ay sheeggeen in ay arrintaa isku waafaqsan yihiin Raafidadu, waxa uu odhanayaa shiikhoodii ALMUFIID la odhan jiray ee qarnigii shanaad noolaa (413 h) ayuu dhintay:

"واتفقوا على إطلاق لفظ البداء في وصف الله تعالى"

Taasina waa kufri, bal iyaga oo leh imaamyaalkayagu waxa ay ogyihiin wixii hore u dhacay oo dhan, iyo waxa kasta oo dib ka dhici doona, ayay haddana leeyihiin ilaahay badaa ayaa lagu sifaynayaa, waa kufri Heer sare gaadhay.

In ilaahay wax walba ogyahayna adillada Quraankaa sheegaysa, Muslimiintuna way isku waafaqsan yihiin.

10. Gaalnimadooda waxa ka mid ah in ay yidhaahdeen shirkiga qur'aanka lagu sheeggay waa

شرك في الإمامة

taasina waa gaalnimo.

Oo shirkiga Nusuusta ku soo arooray waxa loo jeeddaa cibaadada ilaahay in shirki iyo wadaajin lagu sameeyo, sheekhoodii caamili la odhan jiray waxa uu yidhi:

"إن الأخبار متضافرة في تأويل الشرك بالله والشرك بعبادته بالشرك في الولاية والإمامة، أي يشركوا مع الإمام من ليس من أهل الإمامة" مرآة الأنوار

11. Waxyaabaha Gaalnimada ah ee ay ku jiraan waxa ka mid ah; in ay sunnada Nabiga dafiraan in yar mooyee oo ay dhowrkii saxaabi ee ay oggolaayeen soo wariyeen, de intaasina waa wax aad u yarba.

12. Waxyaabaha gaalnimada ah ee ay la yimaaddeen waxa ka mid ah Shirki iyo Cibaadatul qubuur, waa ciddii ugu horraysay ee la timi in xabaalaha la dhiso masaajidna laga dul dhiso, way ku tukadeen, way ka barakaysteen, way ku dawaafeen, way dhunkadeen, wayba u xajiyeen, baabkaa iyagaa imaamyo ku ah Suufiyaduna iyaga uunbay kaga daydeen, waxa ay u qabaan in dadka xabaalaha ku jira in la baryo ay bannaan tahay, shirkina ma noqonayso ayay yidhaahdeen, mid ka mid ah culamadoodii hore oo la dhaho:

المفيد بن نعمان

oo dhintay 413 hijriyada ayaa waxa uu qoray kitaab uu u bixiyay:

Sida xabaalaha loogu xajiyo مناسك حج المشاهد

Dadka qaarkood oo sunne u nisba sheeganaya ayaa xabaalaha dul ictikaafsan oo ka barakaysanaya, iyaga oo u gawracaya una nadraya, soomaalida waxa maahmaahyadooda ka mid ah: **Xabaalo Waalid ayaa Xoolo laga helaa**, Qaarkood ayaa xerooyin ka dul ootay xabaalihii waaliddadood.

Bal culamadoodii horeba markaan iska dayno ee kuwii dambe ama mucaasiriinta ahaa aan ka soo qaadanno, waxa ay ka yidhaahdeen in ilaahay loo shirki sameeyo, khumayni waa ka shiicadii boodhka ka tumay casrigan soona nooleeyay

عليه من الله ما يستحق

Waxa uu yidhi:

"إن الشرك هو طلب الحاجة من غير الله مع الاعتقاد بأن هذا الغير هو إله ورب، وأما إذا طلب الحاجة من الغير من غير هذا الاعتقاد فليس بشرك، ولا فرق في هذا المعنى بين الحي والميت، ولهذا لو طلب أحد حاجته من الحجر والمدر لا يكون شركا"[1]

Mushrikiintii Carbeed markaa maxay ku gaaloobeen? Ilayn macbuudaatka allaah sokadii ay baryayaan umay qabin in ay wax abuuraan, waxna arsaaqaan sida nusuus aad u badani sheegayso.

[1] كشف الأسرار للخميني ص 30

Ee waxa ay uga jeedeen uun sida allaahba ka warrmay

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمْ وَلَا يَنفَعُهُمْ وَيَقُولُونَ هَٰٓؤُلَآءِ شُفَعَٰٓؤُنَا عِندَ ٱللَّهِ ۚ قُلْ أَتُنَبِّـُٔونَ ٱللَّهَ بِمَا لَا يَعْلَمُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿١٨﴾﴾ يونس: ١٨

Shirkigoodu shirku waasida ayuu ahaa, culamaduna waxa ay ijmaac ku soo rareen noocaasi in uu kufri akbar ah yahay.

Intaa haddaan kaga baxano waxyaabaha ay ku sugan yihiin ee gaalnimada ah, oo waxyaabaha dalaalaatka ah ee gaalnimo aan gaadhsiisnay aan wax ka tilmaanno:

## Dalaalaatka ay ku jiraan Shiicadu:

1. Waxa ay xusaan Maalinkii la dilay xusayn binu cali (RC) waana maalinka caashuuraa 10 keeda, Culamada ahlu sunnuhu waxa ay qabaan in la dilay xusayn isaga oo Madluum ah oo laga gardarran yahay, markii horeba ha sameeyo wax laga wanaagsanaaye, maalinkii way isku so baxaan meelay joogaanba, wayna iska dhiijiyaan, xataa carruurta ayay kaga dhiijiyaan! Camalkaa noocaas ah sharci iyo caqli toonna ku tusi mayo, bale'e waa danbiyada waaweyn mid ka mid ah.

   Iyaguna waxa ay ka dhigaan sida kutubtooda qaar badan oo ka mid ah ku sugan, in isu soo baxa maalinkaa iyo baroordiiqa, iyo iska-dhiijintu inay ka mid tahay camallada kuwooda ugu fadliga badan, qaarkood ayaa waxa ay yidhaahdeen maalinkaa in saa la isugu soo baxo waxa ay ka mid tahay

من تعظيم شعائر الله

Waxa ayna xaqdarro ku daliishadeen:

قَالَ تَعَالَى: ﴿ذَٰلِكَ وَمَن يُعَظِّمۡ شَعَٰٓئِرَ ٱللَّهِ فَإِنَّهَا مِن تَقۡوَى ٱلۡقُلُوبِ ۝٣٢﴾ الحج: ٣٢

Khumayni waxa uu yidhi:

"إنّ البكاء على سيد الشهداء عليه السلام، وإقامةَ المجالس الحسينيّة هي التي حفظت الإسلام من أربعة عشر قرنا"

Malaa'igtay xataa ku been-abuurteen oo waxa ay yidhaahdeen: Qabriga Xuseen ilaahay waxa uu u xilsaaray 4000 oo Malak, oo ka dul ooyaya ilaa maalinka Qiyaame laga gaadhayo!!!.

## Kutubta Shiicada agtooda ugu qiimaha badan

Shiicada afar kitab ayaa agtooda ugu qiime badan:

- الكافي – للشيخ الكليني ويحتوي هذا الكتاب على 16199 حديثًا ، وهو الذي يسوونه بصحيح البخاري.
- تهذيب الأحكام – لشيخ الطائفة الطوسي ويحتوي على 13905 حديثًا.
- الاستبصار – لشيخ الطائفة الطوسي ويحتوي على 5511 حديثًا.
- من لا يحضره الفقيه – للشيخ الصدوق ويحتوي على 5998 حديثًا.

2. Waxyaabaha ay qabaan waxa ka mid ah, in ay yidhaahdeen cali iyo imaamyaalka kale waa

كتاب الله الناطق، وقسّموا كتاب الله إلى ناطق وصامت

Waxa ay Cali (Rc) ka sheeggeen iyaga oo ku been abuuranaya in uu yidhi:

"هذا كتاب الله الصامت، وأنا كتاب الله الناطق"    وسائل الشيعة ج 27 ص 34

Waxa kale oo ay soo wariyeen in uu yidhi:

"الأئمة عليهم السلام هم القرآن نفسه" الكافي ج1 ص194

3. Waxa ka mid ah dalaalaatkooda ay qabaan, in imaamyaalkoodu macsuum yihiin, oo aanay danbaabin oo wax qalad ah iyo wax dambi ah aanay marnaba ka dhici Karin, xattaa sahwi ahaan, yacnii cismadii heerkaasay gaadhsiiyeen, shiikhooda majlisi la yidhaahdaa waxa uu yidhi:

"اعلم أن الإمامية اتفقوا على عصمة الأئمة عليهم السلام من الذنوب صغيرها وكبيرها، فلا يقع منهم ذنب أصلا لا عمدا ولا نسيانا، ولا لخطأ في التأويل ولا للإسهاء من الله سبحانه" بحار الأنوار ج25 ص 211.

Martabaddaa ay gaadhsiiyeen imaamyaalkooda may gaadhin nabiyada ilaahay

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَلَقَدْ عَهِدْنَآ إِلَىٰٓ ءَادَمَ مِن قَبْلُ فَنَسِيَ وَلَمْ نَجِدْ لَهُۥ عَزْمًا ﴿١١٥﴾﴾ طه: ١١٥

"إنما أنا بشر أنسى كما تنسون فإذا نسيت فذكروني"

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَعَصَىٰٓ ءَادَمُ رَبَّهُۥ فَغَوَىٰ ﴿١٢١﴾﴾ طه: ١٢١

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿عَبَسَ وَتَوَلَّىٰٓ ﴿١﴾﴾ عبس: ١ الآيات

Cismadaa ay u sheeganayaan Imaamyaalkooda, innaba wax daliil ah uma haystaan, waxa ay xaqdarro ku daliishadeen qayb ka mid ah

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَقَرْنَ فِي بُيُوتِكُنَّ وَلَا تَبَرَّجْنَ تَبَرُّجَ ٱلْجَٰهِلِيَّةِ ٱلْأُولَىٰ ۖ وَأَقِمْنَ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتِينَ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَطِعْنَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ إِنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنكُمُ ٱلرِّجْسَ أَهْلَ ٱلْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا ﴿٣٣﴾﴾ الأحزاب: ٣٣

Aayaddaasina waxa ay ku saabsan tahay ummahaatkii muslimiinta, sida oo kale iraadada aayadda ku soo aroortay waa iraada sharciyah, oo waxa ay la mid tahay

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَٱللَّهُ يُرِيدُ أَن يَتُوبَ عَلَيْكُمْ ﴿٢٧﴾﴾ النساء: ٢٧

"قد أردت أهون من ذلك ألا تشرك بي شيئا فأبيت إلا أن تشرك بي شيئا" حديث الصحيح.

Waxyaabaha tusinaya in aanay macsuumiin ahayn waxa ka mid ah Cali (Rc) in uu waxyaabaha qaarkood oo uu sameeyay, isku ciil kaambiyay, ta kale iyaga ayaa afcaashoodu is khlaaftay, sida xasan iyo xusayn, oo xasan xilkii muslimiinta ayuu Mucaawiya uga tanaasulay, halka Xusayn uu mar dambe ka raadinayay.

4. Waxyaabaha ay qabaan waxa ka mid ah: Tasawufkii oo Talax-tag badan lagu sameeyay, oo ah waxdatul wujuudkii, oo suufiyadii kuwii waxaa

aaminsanaa in badan oo ka mid ah waxa ay ahaayeen shiico, sida ibnu Carabi, iyo Xallaaj.

5. Waxyaabaha ay qabaan waxa ka mid ah, wax  Mutco la yidhaado,

## Mutcada ay Shiicadu Aaminsan yihiin

Mutcadu waa Sinadii iyo Tumashadii oo la xalaalaynayo, oo waxa ay ku leeyihiin; Gabadhii waxa kuu bannaan inaad laba kalmadood is dhaafsataan oo aad ku sheegaysaan waqtiga iyo komishanka aad siinaysid, loomana baahna Wali, Markhaatiyo iyo ogaysiin toonna , muddaduna Saacad ayaay noqon kartaa, ama Maalin, ama laba maalmood ama Bil, ama Sannad, Xaddi ma laha, hadhowna muddadu markay dhammaato furniin uma baahna, ee waa Guri kiradii kaa dhammaatay oo kale, waliba kumay jooggin way bannaan tahay oo kaliya ee waxa ay leeyihiin; fadli weyn ayaa ku sugnaaday, khayrba ma laha kaan cimrigiisa Mutcaysan, Nabiga (ANKH) ayay ku been abuurteen oo waxa ay yidhaahdeen waxa uu yidhi:

"من تمتّع بامرأة مؤمنة كأنما زار الكعبة سبعين مرة"

"من تمتّع مرة كانت درجته كدرجة الحسين، ومن تمتع مرتين كدرجة الحسن، ومن تمتّع ثلاث مرات كدرجة علي، ومن تمتع أربع مرات فدرجته كدرجتي" منهاج القاصدين ص 356.

Waxa ay yidhaahdeen; ka dafira Mutcadu waa Gaal, Maxaa yeelay waa daruuriyaatka mad-habtayada.

Waxa la yaabka leh waxa ay tahay, kuwooda sharafta agtooda ku leh inaanay oggolayn in hablahooda laga Mutcaysto, hablaha kale ayay rabaan in laga mutcaysto, Diintoodu waa Diin ku dhisan Nifaaq iyo Tumasho.

## Mutcadii mar bannaanayd maaha Mutcada Shiicada

Mutco mar diinta ku bannaanayd way jirtay, laakin kaaf iyo kala dheeri ayay kala yihiin Mutcdaaas iyo tan Raafidadu ay qabtaa, oo Mutcadaasi Guurka ayay wax walba kala mid ahayd, hadday tahay xagga Waliga, Markhaatiyada, iclaanka, Cidda tirsiga, Dalaaqa hadhow, hal qodob uun ayay kaga duwanayd guurka waa Waqtiga.

Mutcadaasina waa la nasakhay markii dambe, xaaraan ayayna noqotay Abidkeed.

Mutcadaas ay sameeyaan uma shardiyaan cidda bax, oo saacadba inay nin la mutcaysan karto ayaa bannaan bay leeyihiin, sida Aluusi ka soo naqlinayo, markaas ayuu waxa uu yidhi: "waxa aan la yaabbay raafidi aabbe ku abtirsanaya".

6. Waxyaabaha raafidadu aaminsan yihiin waxa ka mid ah: Karbala Meesha la yidhaahdaa in ay tahay adduunyada halka ugu khayrka badan, uguna fadliga badan, karbalaa waa halkii Xusayn (Rc) lagu dilay, uuna ku aasan yahay, Ardul muqaddasah ayay ku tilmaamaan, waa halka ay ka soo qaataan dhagaxan ay ku sujuudaan.

   Waxa ay leeyihiin karbalaa way ka fadli badan tahay kacbada, culamadooda mid ka mid ah ayaa yidhi:

"أشرف بقاع الأرض بالضرورة" يعني كربلاء

Midbaa gabyay oo waxa uu yidhi:

ومن حديث الكربلا والكعبةِ *** بان للكربلا علوُّ الرتبةِ

Sidaa daraaddeed culamadooda waaweyn may soo xajin, sida Khumayni, iyo Aayatulaahi Siistaani, khumayni waligii ma xajin, Aayatulaahi siistaani waa Ninka jagada lagu wado aayatulaahi khaamin'I ye isna ma soo xajin.

Waxa ay qabaan Siyaarada qabriga Xusayn (Rc) la siyaartaa inay ka khayr badan tahay Xajaj badan.

Waxa ay ku been abuurteen Jacfar asaadiq in uu yidhi:

"لك بكل ركعة تركعها عنده كثواب من حج ألف حجة، واعتمر ألف عمرة، وأعتق ألف رقبة، وكأنما وقف في سبيل الله ألف ألف مرة مع نبيّ مرسل" تهذيب الأحكام ج 6 ص 73.

7. Waxyaabaha ay qabaan waxa ka mid ah inay leeyihiin Jannada waxa loo abuuray aalu baytka, dadka kalena waxa loo abuuray Naarta, dadka kale ee aan ahayn shiicadana waa Gaalo oo waa Nawaasib, kuwii dilay Xusayn, sidaa daraaddeed ahlu sunnaha layntooda ilaahay ayay ugu dhowaadaan, hadday arkaan Gaalo laynaysana way usoo hiiliyaan garabkoodana way istaaggaan, sidii loo xaaqi lahaa ayay ku talo galaan.

## Shiicadu Gaalada miyay iska celisaa?

Dadka qaar ayaad waxa aad ka maqlaysaa iyaga oo leh "Wax Gaalada iska celiya Shiico iyo Iiraan ayaa jira"!!, sidaa may yidhaahdeen ee Shiico ayaanay waxba ka aqoon, Shiico waligood taako ay ka furteen Gaalo may dhicin, hore umay dhicin, dibna umay dhicin, **ilko abeeso hoos ka xidhiidhsan**, maxay Gaaladu ciraaq ugu dhiibeen shiicada? Maxayse usiiyeen Gobolka **Ahwaas**, oo ah gobolka ugu khayraatka badan hadda Iiraan. Oo dhaqalaahaooda %90 halka ay ka helaan ah.

## Qabsashadii Baqdaad, iyo Xasuuqii 1-ka Milyan ee Ahlu Sunnaha ah la xasuuqay, iyo Raafido inay Xasuuqaa Geysteen

Gaalo lama dagaalammaan, taakona kama qabsadaan, taariikhaha hore ha la baadho, haddii aad eegtid ridistii la riday Cabaasiyiinta, iyo Qabsashadii la qabsaday baqdaad 656 hijriyada, waxa ka adeegay laba Nin oo Raafido ah, oo midna la odhan jiray

نصير الدين الطوسي

Sidaas ayuu isku magacaabay, culamaduse waxa ay u yaqaannaan

نصير الشرك

iyo Nin la odhan jiray ibnu Calqami, labadaas ayaa ka adeeggay, boqorkii cabaasiyiinta ayuu u yimi

النصير الطوسي

Taqiyadii ayuu u isticmaalay, wuu ammaanay, wuuna isku dhedhejiyay, Boqorkii wuu ku dagmay, wuuna soo dhoweystay oo Wasiir ayuu ka dhigtay, Gaaladii Tataarka ahaa oo markaa Holaako hoggaaminayo ayuu warqad u qoray, kuna yidhi: na soo weerar, waxa uu ku yidhi: waar Ciidanka Baqdaad way badan yihiin, lamana soo aamini karo, oo boqol kun ayay kor u dhaafayaan, laakiin haddaad run sheeggayso ciidanka kala dir, waayahay ayuu yidhi Raafidigii, Boqorkii ayuu u tagay oo ku yidhi: Ciidamadan badan Masruuf aan siinno ma haynno, ee kala dhin, markii ugu horraysay 15,000 ayuu dhimay, haddana wuu ku celiyay oo 20,000 ayuu dhimay, wuu sii waday ilaa ay ka soo hadhay 10,000 oo kaliya, Warqad ayuu haddana u qoray oo wuxu ku yidhi way sallaxan tahay ee soo weerar, Tataarkii ayaa soo duulay, Boqorkii ayuu Raafidigii u tagay oo ku yidhi: heshiis aan innooga soo dhammeeyee ii dir aniga (raafidi ayuu aaminay! Ma raafidi ayaa la aaminaa!! Caammo waa caammo)
Wuu u tagay, sirtii oo dhanna wuu uga dhacay, wuxuna ku yidhi imikana waan kuuso shirqoolayaaye markaan kuusoo shirqoolo birta ka asal, Boqorkii ayuu ku soo noqday oo waxa uu ku yidhi: heshis ayuu diyaar u yahay, waliba inaad xididaan oo inankaaga inantiisa u guuriyana diyaar buu u yahay, markaa ina keen aan heshiiska la soo galnee, ciidan ayuu doonay inuu kaxaysto, waxa uu ku yidhi: "oo heshiis ayaan soo galaynaaye

maxaad ciidanka ka kaxaysanaysaa?!!!" Xaashiyada kale ee kaa ag dhow Culamada, Garsoorayaasha iyo madaxda uun soo kaxayso oo ina mariya" ilaa 700 oo Qof oo xulkii ah ayuu kaxaystay, markii ay u tageen Holaako ayaa badankoodii la qabqabtay, Maxaabiisna laga dhigay, si hadhow loo laayo, inyar oo Boqorkii ku jirana gudahaa loo sii daayay, Boqorkii Holaako ayaa doonay inuu intuu ihaanaysto sii daayo, heshiisna la galo, markaas ayuu Raafidigii khabiithka ahaa ku yidhi: "may, ha sii daynin ee birta ka asal, ma waxaad rabtaa inay ciidan kuu soo urursadaan"!
Dabeetana Boqorkiina waa la dilay, dabeetana xarumihii iyo goobihii oo dhan ayuu marsiiyay isaga oo ku leh; intaasi waa shiico ee ha iga taaban, inta kale gummaad uun.
Dadkaas halkaa lagu laayay 1 milyan oo Qof way gaadhayaan, marka aad loo yareeyo 800,000 oo qof ayaa lagu sheeggaa, shiicana ilaa hadda way ku faannaan xasuuqaa ahlu sunnaha loo gaystay, wayna ammaanaan ninkaa Alnasiiru Duusi, waxayna ka dhiggaan Nin maqaam sare joogga.

8. Waxyaabaha ay yidhaahdaan waxa ka mid ah ee ay qabaan, in ay yidhaahdaan jumco iyo jihaad toona nama saarna ilaa uu ka soo baxayo imaamkooda muntadarka ah.

9. Waxa ay yidhaahdaan ahlu sunnaha isku Ilaah ma nihin isku Nabina ma nihin,

قال نعمة الله الجزائري: "إنا لم نجتمع معهم -أي أهل السنة- على إله ولا على نبيّ ولا على إمام، وذلك أنهم يقولون: إن ربهم هو الذي كان محمد نبيه، وخليفته بعده أبو بكر، ونحن لا نقول بهذا الرب ولا بذاك النبي، بل نقول: إن الرب الذي خليفة نبيه أبو بكر ليس ربّنا ولا ذاك النبي نبيّنا" الأنوار النعمانية ج2 ص 278 - 279.

10. Waxa ay qabaan in ay ahlu sunnuhu yihiin Garacyo, oo waxa ay yidhaahdaan: "ibliis ayaa u yimaadda Ruuxu marka uu dhalanayo, hadduu Shiicadayada yahay waa laga xijaabaa, oo waa laga ilaaliyaa, haddii kale Wiilkana dabada ayuu faraha ka galiyaa, inantana xubinta taranka. Dabeetana Wiilkana dabada ayaa sidaa lagaga maraa, inantuna way sinaysataa!!!" Waxa ay yidhaahdeen oo kutubtoodu qoraysaa:

"إن الناس كلهم أولاد بغايا ما خلا شيعتنا"

11. Waxa kale oo ay qabaan in ilaahay uu eeggo dadka soo siyaarta qabriga Xusayn intaanu eeggin dadka kacbada taaggan, waayo baa la yidhi? Markaas ayay yidhaahdeen: "waayo kuwa qabriga Xusayn joogga Garacyo kuma jiraan, laakiin kuwan kacbada taaggan Garacyo ayaa ku jira.

## Kulmista ay ku kulmeen Culamadu Gaalaysiinta Raafido:

Culamo badan ayaa soo raray Raafidadu in ay Gaalo yihiin, innaguna waxyaabo badan oo gaalnimo ah oo ay ku suggan yihiin ayaan soo sheegnay.

قال الإمام أحمد رحمه الله: الرافضة كفار

Culamada kalena sidaas oo kale ayay cabbireen, bale'e culamada qaarkood ayaa **Ijmaac**[1] ku soo raray in ay Gaalo yihiin Raafidadu.

Ninkan immika soo nooleeyay, boodhkana ka tumay ee **khumayni** la yidhaahdo Culamo badan ayaa gaalaysiisay, Mu'tamarka islaamiga ah ee 1408 ka qabsoomay Makka, oo ay qabteen Culamo badan oo Caalamka iskaga yimi, waxa ay isku waafaqeen in uu khumayni yahay Gaal, haddaa maaha culamada sucuudiga oo kaliya, ee waa Culamo Caalamkoo dhan iskaga yimi.

Imaamul Albaani (AHUN) waxa lagu dul akhriyay 5 hadal oo uu leeyahay khumayni, waa gaalnimo ayuu yidhi hadalladaasi, cidda ku baaqaysaana waa Gaalo.

Raafido khayr ma leh caalamkana aad ayay ugu faafayaan, hadday Soomaaliya yimaaddaanna, cidda ay ku soo degayaan waa la garanayaa!.

1قال السمعاني رحمه الله: " واجتمعت الأمة على تكفير الإمامية، لأنهم يعتقدون تضليل الصحابة وينكرون إجماعهم وينسبونهم إلى ما لا يليق بهم ". الأنساب 6 / 341، وكذلك شيخ الإسلام نقل هذا الإجماع بهذه العلّة نفسها.